
الدروس المهمة لعامة الأمة - **صومالي**

# DURUUS MUHIIM U AH

Waxa Curiyay :

**Sheekh**
**Cabdil Aziiz bin Cabdullaahi bin Baaz**
Ilaahay ha unaxariistee-



Islamhouse.com
المحتوى الإسلامي

# DURUUS MUHIIM U AH UMADA DHAMAANTEED

Waxa Curiyay Sheekh

Cabdil Aziiz bin Cabdullaahi bin Baaz

Ilaahay ha unaxariistee-

شركاء التنفيذ:

دار الإسلام جمعية الربوة رواد الترجمة المحتوى الإسلامي

يتاح طباعة هذا الإصدار ونشره بأي وسيلة مع

الالتزام بالإشارة إلى المصدر وعدم التغيير في النص.

Telephone: +966114454900

ceo@rabwah.sa

P.O.BOX: 29465

RIYADH: 11557

www.islamhouse.com

# HORDHAC

Waxaan ku bilaabayaa Magaca Allaah Ee Naxariista Naxariis guud (Muslim iyo Gaalba, Dad iyo Duunyaba) mid gaar ahna ugu naxariista Mu'miniinta (Maalinta Aakhiro).

Mahad oo idil waxaa leh rabiga uumay caalamka, naxariis iyo nabadgalyo ha'ahaato Nabi muxamed korkiisa iyo ehelkiisa iyo saxaabadiisa dhamaantood

intaa kadib:

Kuwani waa kalmado kooban oo cadaynaya qayb ka mida qodobo ay waajib tahay inay ogaadan oo bartaan umadu guud ahaan dhanka diintooda, waxaanan u bixiyay magiciisa: Duruus muhiim u ah Umada dhamaanteed

Ilaahay ayaan waydiisanayaa in uu ku anfaco muslimiinta, igana aqbalo, isaga ayaa deeqsi kariim ah.

Cabdil Aziiz bin Cabdullaahi bin Baaz

# Duruus muhiim u ah Umada dhamaan

## DARSIGA KOOWAAD : Suurada Al-faatixa iyo Suuradaha gaagaaban

Suurada Alfaatixa iyo intii suurto gal ah suuradaha gaagaaban, laga bilaabo Suurada Az-zalzalah ilaa Suurada An-naas, akhrin, sixida akhrinteeda, xifdin, iyo sharaxaada inta ay waajib tahay in la fahmo.

## DARSIGA LABAAD: TIIRASHA ISLAAMKA

Cadaynta tiirasha islaamka ee shanta ah: mida koowaad uguna wayni waa Shahaadada, oo ah in la qiro in ilaahay mooyee uuna ilaah kale jirin, Muxamedna rasuulkiisa yahay, taasi oo macnaheedu yahay: ma jiro ilaah la caabudo oo ilaahay ka sokeeya, cibaado oo dhana isagaa leh, Shuruudeeduna waa: Aqoon ka badhaxtiran garasho la'aan, yaqiin ka badhaxtiran shaki, Ikhlaas ka badhaxtiran shirki, Run ka badhaxtiran been, Jacayl ka badhaxtiran nacayb, hogaansi ka badhaxtiran Shirki, ogolaansho ka badhaxtiran diidmo, in laga kufriyo wixii la caabudo ilaahay ka sokow, waxaana lagu ururiyay laba bayd oo gabay ah:

Aqoon, yaqiin, ikhlaas, runsheeg ay la socoto Jacayl, hogaansi, ogolaanshaheeda, waxa lagu daray mida sideedaad in lagu kurfiyo wixii ka soo hadha ilaahay oo waxyaabo kale ah

Cadaynta Shahaadada Muxamed Rasuulullaah waxa weeyi: in la rumaysto wixii uu kawaramay, adeecida wixii uu amray, ka fogaanshaha wixii uu reebay ee uu diiday, iyo in aan ilaahay lagu caabudin wixii uu sharciyeeyay isaga iyo rasuulkiisu mooyee, dabadeedna waxa loo cadayn ardayga tiirasha kale ee islaamka ee shanta ah: Salaada, Zakada, Soonka, iyo in la tago xajka baytka ilaahay inta awooda.

## DARSIGA SADEXAAD: TIIRASHA IIMAANKA

Waa lix: in aad rumayso Ilaahay, Malaa'iktiisa, Kutubtiisa, Rusushiisa, Maalinka qiyaame, iyo rumaynta Qadarka, wanaagiisa iyo sharkiisuna ilaahay ka ahaadeen.

## DARSIGA AFARAAD: QAYBAHA TAWXIIDKA IYO QAYBAHA SHIRKIGA

Cadaynta Qaybaha Tawxiidka, waa sadex: Tawxiidka Rubuubiya, Tawxiidka Uluuhiya, Tawxiidka Asmaada iyo Sifaadka.

Tawxiidka Rubuubiya, oo looga jeedo: in la rumeeyo in Ilaahay sw uu yahay Abuuraha wax kasta, siduu doonana ugadgadin kara, cid kula wadaagtaana ma jirto arimahaas.

Tawxiid Uluuhiya (cibaadada) oo looga jeedo: in la rumeeyo Ilaahay sw inuu yahay midka lagu caabudo dhab, cid la wadaagtaana ma jirto, waana macnaha kalmada tawxiidka ee Laa'ilaaha illa Laahu, taasi oo macnaheedu yahay mid xaq lagu caabudo majiro ilaahay mooyee, cibaadada dhamaanteedna salaada, soonka, iwm, in loo badhax tiro kaligii ayaa waajib ah cid kalena aan loo leexin, lalana wadaajin

Tawxiidka Asmaada (magacyada) iyo Sifooyinka (tilmaamaha) waa: in la rumeeyaa in dhamaan wixii ku soo arooray Quraanka Kariimka iyo Axaadiista saxiixa ah ee magacyada ilaahay ah iyo tilmaamihiisa ah, loona sugo ilaahay kaligii sida ugu haboon ee hufan, iyadoon la badalayn, macnaheeda ladiidayn, la iswaydiinayn siduu ku noqday sidaas, cid kalena aan lagu matalayn, waxaana daliil u ah midaas hadalka ilaahay sw: { dheh "nabi muxamadow' Ilaahay waa kali isagaa loo tiirsadaa oo deeqtoon Allaah wax ma dhalin lamana dhalin mana jirto cid u dhiganta oo lagu tilmaami karo} suurada As-samad (al ikhlaas) iyo hadalka ilaahay koreeye:

﴿فَاطِرُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِۚ جَعَلَ لَكُم مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَزْوَٰجًا وَمِنَ ٱلْأَنْعَٰمِ أَزْوَٰجًا يَذْرَؤُكُمْ فِيهِۚ لَيْسَ كَمِثْلِهِۦ شَىْءٌۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ﴾ [الشورى: 11]

(ma jirto shay ilaahay la mid ah waana maqle arke ah) Suurada Ash-shuuraa aayada 11

Culimada badhkood ayaa ka dhigay labo nooc oo kaliya, isla markaana galiyay Tawxiidka Asmaada iyo Sifooyinka midka Tawxiidka rubuubiyada. hadii sidaas loo dhigana wax dhib ahi kuma jiro maadaama ay cadahay qaybihiisu.

Qaybaha Shirkiguna waa sadex: Shirki wayn, Shirkiga Yar, iyo Shirkiga Qarsoon.

Shirkiga Wayn wuxuu waajibiyaa camalka oo bura, naarta oo lagu waaro cidii ku dhimata isagoo kujira. sida ilaahayba koreeye yidhi:

﴿ذَٰلِكَ هُدَى ٱللَّهِ يَهْدِى بِهِۦ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦۚ وَلَوْ أَشْرَكُوا۟ لَحَبِطَ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ﴾ [الأنعام: 88]

{Hadii ay shirki la iman lahaayeen wuu buri lahaa wixii ay sameeyeen} Suurada Al ancaam aayada 88 ilaahay koreeye wuxuu yidhi:

﴿مَا كَانَ لِلۡمُشۡرِكِينَ أَن يَعۡمُرُواْ مَسَٰجِدَ ٱللَّهِ شَٰهِدِينَ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِم بِٱلۡكُفۡرِۚ أُوْلَٰٓئِكَ حَبِطَتۡ أَعۡمَٰلُهُمۡ وَفِي ٱلنَّارِ هُمۡ خَٰلِدُونَ ١٧﴾ [التوبة: 17]

(uma bannaana gaalada inay camiraan Masaajiidda Eebe iyagoo ku qiri Naftooda gaalnimo kuwaas waxaa buray camalkoodii naartana way ku dhex waari) Suurada At-tawbah aayada 17 qofka ku dhintana shirkiga malaha dabni dhaaf, janaduna xaaraam ayay ka tahay sida uu ilaahay nasahnaa oo koreeye yidhi:

﴿إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغۡفِرُ أَن يُشۡرَكَ بِهِۦ وَيَغۡفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ لِمَن يَشَآءُۚ وَمَن يُشۡرِكۡ بِٱللَّهِ فَقَدِ ٱفۡتَرَىٰٓ إِثۡمًا عَظِيمًا ٤٨﴾ [النساء: 48]

Allaah ma dhaafo in wax lala wadaajiyo (shariik loo yeelo) Wuuse u dhaafaa wixii intaasi (Shirkiga) ka soo hadhay Ciduu doono Suurada An-nisaa aayada 48 ilaahay koreeye wuxuu yidhi:

﴿لَقَدۡ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلۡمَسِيحُ ٱبۡنُ مَرۡيَمَۖ وَقَالَ ٱلۡمَسِيحُ يَٰبَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ رَبِّي وَرَبَّكُمۡۖ إِنَّهُۥ مَن يُشۡرِكۡ بِٱللَّهِ فَقَدۡ حَرَّمَ ٱللَّهُ عَلَيۡهِ ٱلۡجَنَّةَ وَمَأۡوَىٰهُ ٱلنَّارُۖ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنۡ أَنصَارٖ ٧٢﴾ [المائدة: 72]

(Ruuxii u Shariig Yeela Eebe (La wadaajiya) wuxuu Eebe ka Xarrimay Jannada wuxuuna ku hoyan Naarta Daaliimntuna ma helaan Gargaare) Suurada Almaa'ida aayada 72

Noocyadiisa waxaa ka mida: Baryada dadka dhintay, sanabyada, iyo ka gargaar dalabkooda, nadarka loo sameeyo, xoolo loo gawraco, iwm.

Shirkiga yarna: waa midka ku soo arooray aayadaha iyo axaadiista ee ay ku magacaabeen shirki, laakiin aanan gaadhsiisnayn shirkiga wayn sida: istuska cibaadada, cid aan ilaahay ahayn oo lagu dhaarto, kalmada ah hadii ilaahay doono hebelna doono, iwm, waxaana daliil u ah hadalka nabiga scw. (cabsida ugu wayn een idiinka baqayaa waa Shirkiga yar). waa la waydiiyay xagiisa, wuxu yidhi: Waa istuska waxaa wariyay imam Axmed, iyo Dabaraani, Bayhaqi, oo ka wariyay Maxmuud bin Labiid Al-ansaari, Allaha ka raali noqdo, isnaad wanaagsan, Dabaraanina wuxu ku wariyay Asaaniid wanaagsan, oo ka wariyay Maxmuud bin Labiid, oo ka wariyay Raafic bin Khadiij oo ka wariyay Nabiga scw: Iyo hadalkiisa Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee (Ruuxa ku dhaarta shay aan ilaahay ahayn wuxu la yimiday shirki) waxa wariyay Imaam Axmed, Sanad saxiixa. Waxa laga wariyay Cumar bin khadaab -rc,

Abuu Daa'uudna iyo Tirmidina ku wariyeen sanad Saxiix ah xadiiska Ibn cumar r.c. oo ay nabiga scw ka wariyeen in uu yidhi: (Qofka ku dhaarta cid aan ilaahay ahayn xaqiiqdii wuu kufriyay ama shirkiyay) Iyo hadalkiisa Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee: (Ha odhanina hadii ilaahay doono iyo hebel, laakin dhaha hadii ilaahay doono, dabadeedna hebel). waxa soo saaray Abuu Daa'uud sanad saxiix ah, oo ka wariyay Xudayfa bin Yamaan rc.

Noocaasi kama waajibayso Rido, naartana kuma waaro qofkaasi, laakiin wuxuu ka hor imanayaa dhamaystirka Tawxiidka waajibka ah.

NOOCA SADEXAAD: Waa shirkiga Qarsoon,waxaana daliil u ah hadalka Nabiga scw (Ma idiinka waramaa wax aan idinka cabsi badanahay agtayda xataa Masiix Dajaal? waxay yidhaahdeen: haa Rasuulkii ilaahayow, wuxuu yidhi: waa shirkiga qarsoon, oo ruuxu marka uu tukanayo uu qurxiyo salaadiisa si loo arko) Waxa wariayay Imaam Axmed, oo ka wariyay Abii Saciid Alkhudri, rc. waxaa kale oo loo qaybin karaa laba nooc: Mid wayn iyo mid yar midka qarsoona labadoodaba wuu koobsanayaa. oo midka waynа wuu noqon karaa sida shirkiga munaafiqiintu, maxaa yeelay way qarinayaan waxay aaminsan yihiin, waxayna soo muujisanayaan islaamka istusnimo darteed, iyo naftooda

oo ay u baqayaan. Shirkiga yarna wuxuu ku noqon karaa istusnimada, sida kusoo aroortay xadiiskii Maxamuud bin Labiid Alansaari ee horeeyay, iyo xadiiskii Abii Saciid ee hore.

## DARSIGA SHANAAD: IXSAANKA AMA SAMAFALKA

TIIRKA IXSAANKU WAA: in aad u caabudo ilaahay sidii aad arkayso, hadii aanad arkayna isaga ayaa ku arkaya.

## DARSIGA LIXAAD: SHURUUDA SALAADA

Waana sagaal: Islaanimo, Caqli, wax garasho, Xadath oo la kor yeelo, najaasadoo la tiro, asturka cawrada, wakhtigeeda oo galay, qiblada oo loo jeesto, niyada.

## DARSIGA TODOBAAD: TIIRASHA SALAADA

Waa Afar iyo toban istaaga qofkii awooda, Takbiirta xidhashada salaada (Allaahu Akbar), Faataxada oo la akhriyo, Rukuucda, istaaga rukuucda kadib oo lagu ekaado, in laga Sujuuda todobada xubnood, Sujuuda oo laga soo tooso, Fadhiga u dhexeeya labada sujuudood, in lagu xasilo dhamaan acmaasha (salaada), in aan lakala hormarin tiirashaas, Attixyaadka danbe, in loo fadhiisto

attaxyaadkaas, Nabiga scw oo lagu saliyo, Labada salaamo naqsi,

## DARSIGA SIDEEDAAD: SALAADA WAAJIBAADKEEDA

Waana sideed oo kala ah sidan: Dhamaan takbiirooyinka Salaada mida xidhashada mooyee, odhaahda: Samicallaahu liman xamidah, oo macnaheedu yahay: (ilaahay wuu maqlay ruuxi mahadinaya) imaamka ayaa odhanaya iyo qofka kaligii tukanaya, iyo odhaahda Rabanaa walakalxamdu, macnaheeduna yahay (Rabigayow adiga ayaa leh mahad) waxa odhanaya: Imaamka ama midka la tujinayo (ma'muunka), iyo qofka kaligii tukanaya. odhaahda: Subxaana rabiyalcadiim oo qofku odhanayo wakhtiga Rukuucda. odhaahda: Subxaanala Rabiyalaclaa oo la odhanayo xiliga sujuuda. iyo odhaahda: Rabiqfirlii oo la odhanayo labada sujuudood dhexdooda. iyo Attixyaadka hore. fadhiga Attixyaadka hore.

## DARSIGA SAGAALAAD: CADAYNTA ATTIXYAADKA:

waa in uu yidhaahdo:

التحيات لله ، والصلوات ، والطيبات ، السلام عليك أيها النبي ورحمة الله وبركاته ، السلام علينا وعلى عباد الله الصالحين ، أشهد ألا إله إلا الله ، وأشهد أن محمدا عبده ورسوله .

kadibna wuxuu u ducaynayaa oo uu barakaynayaa Nabiga scw, isagoo odhanaya ducadan:

اللهم صل على محمد ، وعلى آل محمد ، كما صليت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم ، إنك حميد مجيد ، وبارك على محمد ، وعلى آل محمد ، كما باركت على إبراهيم ، وعلى آل إبراهيم إنك حميد مجيد .

Kadib wuxuu Ilaahay ka magangalayaa Attixyaadka danbe dhexdiisa: Cadaabta Jahanama, iyo Cadaabta Qabriga, iyo Fitnada nolosha iyo geeridaba, iyo Fidnada Masiix Dajjaal, dabadeed wuxuu doordooran qofka tukanayaa ducada uu doono, waxaana haboon in uu kuducaysto ducooyinka soo arooray ee ay ka mid tahay:

اللهم أَعِني على ذكرك وشكرك وحسن عبادتك ، اللهم إني ظلمت نفسي ظلما كثيرا ، ولا يغفر الذنوب إلا أنت ، فاغفر لي مغفرة من عندك ، وارحمني إنك أنت الغفور الرحيم.

Attaxyaadka koowaad ee salaadaha Duhurka, Casarka, Maqribka, Cishaha, waxa uu u kacayaa rakcada sadexaad marka uu dhameeyo labada Shahaadadood, hadii uu ku saliyo Nabigana scw, waa mid haboon sida soo aroortay

# DARSIGA TOBNAAD: SUNOOYINKA SALAADA

Waxaa ka mida:

Ducada lagu furfurto salaada

Gacanta midig dhudhunkeeda oo la dul dhigo mida bidix, lana dul saaro laabta wakhtiga ruuxu sarajoogo, iyo rukuucda horteed ama dabadeed.

Waa in kor loo qaado labada gacmood iyada oo ay farahoodu isku dhagan yihiin oo ay taagan yihiin oo lala simo labada garab ama labada dhagood, marka uu ruuxu salaada xidhanayo, ama rukuucayo ama ka tooso rukuucda, iyo marka uu ka soo kaco Attixyaadka koowaad.

wixii ka badan hal mar odhaahda tasbiixda rukuucda iyo sujuuda.

wixii ka badan odhaahda Rabanaa lakal xamdu marka ruuxu ka soo tooso rukuucda, iyo intii ka badan ducada la akhriyo labada sujuudood dhexdooda

Madaxa oo lala simo dhabarka rukuucda dhexdeeda

in lakala fogeeyo wakhtiga sujuuda xubnahan: labada jijimood iyo feeraha, caloosha iyo bawdoyooyinka, dhudhumaha iyo bawdooyinka.

labada xusul oo dhulka kor looga qaado wakhtiga sujuuda.

qofka tukanaya waa in uu ku fadhiisto lugtiisa bidix oo goglan, mida midigna kor u taago Attiyaadka hore iyo labada sujuudood dhexdooda.

in uu ku fadhiisto sinta Attixyaadka danbe, isaga oo salka saaraya dhulka, lugta bidixdana ka yeelo mida midig hoosteeda, mida midigta ahna kor u taago.

Farta murugsatada oo la taago labada Attixyaadba laga bilaabo odhaahda Ashahaadada ilaa laga dhamaynayo, lana dhaqaajiyo wakhtiga ducada.

in lagu saliyo Nabigeena Muxamed scw iyo ehelkiisa, iyo in lagu saliyo Nabi Ibraahim scw iyo ehelkiisa Attixyaadka koowaad.

Ducada la akhriyo Attixyaadka danbe.

in kor loo qaado Quraanka salaadaha Fajarka, Jumcada, labada ciidood, Roobdoonta, iyo labada rakcadood ee Salaada Maqrib iyo Salaada Cishaha.

in hoos loo akhriyo Quraanka Salaadaha Duhurka, Casarka, iyo rackacada sadexaad ee Maqribka, iyo labada danbe ee Cishaha.

Akhrinta inta dheeraadka ka ah Suuratul faatixa oo ah quraanka kale waa sunno. waxaa kale oo loo baahanyahay ilaalinta sunooyinka kale ee ee soo aroortay oo salaadda sunnooyinkeeda ka mid ah inta soosheegnay mooyee, waxaana ka mid ah: odhaahda "Rabbanaa walakal xamdu",oo ah marka laga soo tooso Rukuucda sune u ah Imaamka, midka la tujinayo, iyo ruuxa kaligi tukanaya, waxa kale oo ka mid ah sunyaasha salaada, in labada baabaco la dul saaro labada jilib iyodoo faruhu kala bixsan yihiin wakhtiga rukuucda.

## DARSIGA KOW IYO TOBNAAD: SALAADA WAXYAABAHA BURIYA

Waana sideed oo kala ah sidan:

Hadalka u kaska ah, oo ruuxu xusuusan yahay ogsoon yahayna, hadiise uu yahay mid hilmaasan ama garasho dari ma jabinayo salaada.

Qosolka

Cunida

Cabida

Cawrada oo faydanta

inbadan laga leexdo qiblada dhankeeda

dhaqdhaqaaq fara badan ee isku xigxigta

Waysada oo burta

## DARSIGA LABO IYO TOBNAAD: SHURUUDAHA WAYSADA

waana toban kala ah: Ruuxu inuu muslim yahay, Caqli leeyahay, wax kala sooci karo, in uu niyaysto waysada, in uu niyadaas la yimaado laga bilaabo waysada ilaa oo uuna goyn ilaa uu dhamaystiro dahaaro qaadashada, in uu ka go'oy (dhamaystay) wixii waajibinayay waysada sida kaadi ama saxaro, inuu ku istijoodo biyo ama dhagax, in biyaha

uu ku wayso qaadanayo daahir yihiin oo wax banaan u ah isticmaalkoodu, in uusan jirin wax biyaha waysada u diiday in uu jidhka si fiican u gaadhaan sida (rinjiga). in wakhtiga salaadu galo qofkii uuna ka go'ayn nijaastu sida: qofka ay ka socoto kaadida aan joogsiga lahayn.

## DARSIGA SADEX IYO TOBNAAD: WAYSADA FARADYAALKEEDA:

Waa lix: Wajiga oo la maydho, waxa wajiga ka mida: luqluqasho iyo sandaar, Gacmaha oo la dhaqo ilaa laga gaadhayo suxulada, madaxa oo la masaxo dhaguhuna waa ka mid. labada lugood oo la maydho ilaa kuraanta (anqawyaha). in sidaas la iskugu xijiyo oo aan lakala hormarin. in aan wakhti loo dhaxaysiin. waxaa kale oo haboon in lagu ceceliyo dhaqida wajiga iyo gacmaha iyo lugahaba midkiiba sadex jeer, sidoo kale luqluqashada iyo sandaarkaga, walow inta waajibka ahi tahay hal mar kaliya. masixida maduxu waa hal mar oo laguma celcelinayo sida ay ku soo aroortay axaadiis saxiix ahi.

## DARSIGA AFAR IYO TOBNAAD: WAYSADA WAXYAABAHA BURIYA (JABIYA)

Waa lix: Wixii ka soo baxa labada ibood, (kaadi iyo saxaro iwm). Najaasada jidhka ka soo baxda. Caqli qofka oo taga ama hurdo ha ku tago ama wax kalee. Xubnaha taranka (rag iyo dumar) oo loo taabto si toos ah. Cunida hilibka geela. Ruuxa oo diinta ka baxaa, Allaha naga badbaadiyee

baraarujin: Maydhista maydku sida saxda ah ma buriso waysada, waana sida ay qabaan in badan oo ka mida dadka cilmiga leh, maxaa yeelay daliil kusugan midaas ma jiro, laakiin hadii qofka maydhayaa uu taabto xubnaha taranka maydka waa ay ka burtay waysadii.

Sida waajibka ahina waa in uuna taaban xubnihiisa taranka si toos ah ee waa inuu wax ka xigaan sida maro oo kale. Sidaas oo kal taabashada qofka haweenka ahi ma buriso waysada maadaama ayna waxba ka soo bixin ibtiisa, sida laga soo guuriyay nabiga scw. in uu dhunkaday haweenkiisa qaar ka mida oo uu iska tukaday isaga oo aan wayso qaadan.

Aayada ku taal suuradaha An-nisaa iyo Almaa 'ida ee sheegtay taabashada

أَوْ لَامَسْتُمُ النِّسَاءَ

An-nisaa aayada 43 Almaai'ida 6 waxaa looga jeedaa taabashadaas Galmada, waana midka saxda ah labada hadal ee culimadu ka yiraahdeen, waxaana xoojiyay Ibnu cabaas r.c iyo culimo kale. Allaah ayaa leh waafajintee

## DARSIGA SHAN IYO TOBNAAD: ISKU QURXINTA AADAABTA IYO AKHLAAQADA LOO JIDEEYAY QOF KASTA OO MUSLIM AH

Waxaa ka mida: Runta, Amaanada, Dhawrsanaanta, Xishoodka, Geesinimada, Deeqsinimada, Balan oofinta, in laga hufnaado wax walba oo xaaraan ah, Daris wanaaga, u gargaarida inta dhiban, iyo kuwo kale oo badan oo quraanka iyo sunadu sheegeenba.

## DARSIGA LIX IYO TOBNAAD: KU DHAQANKA AADAABTA ISLAAMKA

Waxaa ka mida: Salaanta, waji furfurnaanta, midigta oo lagu cuno laguna cabo, bisinka oo loo qabto, ilaahay oo lagu mahadiyo marka laga baxo. ruuxa hindhisa oo yiraahda Alxamdulilaah. midka maqlaya mahadiisaas oo u duceeya. qofka buka oo la booqdo. Maydka oo la raaco salaadiisa iyo aaskiisaba. Aadaabta lagu galo masjidka. mida lagu galo lagana baxo guriga. Aadaabta safarka. Aadaabta lagula dhaqmo labada waalid, qaraabada, dariska, dadka waayn iyo kuwa yaryarba. in loo hambalyeeyo dadka ilmo u dhashay. in loo baariko lamaanaha is guursaday. in loo tacsiyeeyo inta dhibtu ku dhacday. iyo kuwo kale oo badan oo ka mida aadaabta islaamka sida: xirashada dharka, kabaha, iwm.

## DARSIGA TODOBA IYO TOBNAAD: KA DIGTOONAANTA SHIRKIGA IYO QAYBAHA DANBIYADA (MACSIDA)

Waxa kamida: Todobada lagu halaagsamo sida: Shirkiga (ilaahay oo cid kale lala wadaajiyo). Sixirka. Nafta Ilaahay xarimay dilkeeda. Cunida Ribada. Cunida xoolaha Agoonta. in la cararo oo la cabsado maalinta iska hor yimaadaan

Muslimiinta iyo gaaladu. Haweenka Muminiinta ah ee dhawrsan oo la dhaleeceeyo.

Waxa kal oo ka mida: Labadii waalid ee ku dhalay oo caasi lagu noqdo. Qaraabada oo la gooyo. Markhaatiga beenta ah. Dhaarta Beenta ah. Dariska oo la dhibo. Dadka oo laga dulmiyo dhiigooda, maalkooda, sharaftooda. Khamriga oo la cabo. Khamaarka oo la cayaaro. Xanta. isku dirka iwm kuwaa oo naga reebay ilaahay s.w iyo Rasuulkiisa scw xagooda.

## DARSIGA SIDEED IYO TOBNAAD: QABANQAABADA MAYDKA, KUTUKASHADIISA IYO AASKIISA

Waatan iyada oo faahfaasana: Kow: In ruuxa naftu ka baxayso loo laqino (qabto) Ashahaadada. waxa ku tusinaya midaas hadalka Nabiga scw. {u laqina (qabta) ruuxa naftu ka baxayso Laa'illaaha illalaahu}

waxaa saxiixiisa ku wariyey muslim

Waxa looga jeedaa Maydkana midka naftu hayso ee laga arko calaamadihii dhimashada. LABAAD Marka uu ogaado in naftu ka baxday indhaha ayuu u xidhayaa labada daana

waa la isku adkeeyaa. sida sunadu kusoo aroortay: SADEXAAD Waxaa waajib ah in la maydho Maydka qofka muslmidka ah hadii uusan ahayn Mid Shahiida oo ku dhintay dagaal ilaahay dartiis ah Shahiidkaas lama maydhayo, lagumana tukanayo, waxaa la aasayaa isaga oo xidhan dharkiisa, maxaa yeelay Nabigu scw. ma maydhin saxaabadii ku shahiiday dagaalkii Uxud kuman tukan. AFRAAD QAABKA MAYDKA LOO MAYDHAYO Ugu horaynba waa in la qariyaa cawradiisa. dabadeed kor loo yara qaadaa oo calooshiisa looga maroojaa si fudud. dabadeed loo daahiriyaa (istijeeyaa) iyadoo qofka maydhayaa gacmaha gashanayo maro (karin) iwm. kadibna u wayseeyaa sidii salaada. markaas kadib ayuu ku maydhrayaa madixiisa iyo gadhkiisa Biyo iyo Gob, ama wixii u dhigma. dabadeed wuxuu maydhayaa dhankiisa midig, kadibna dhanka bidix. sidaas oo kale ayuu u dhaqayaa mar labaad iyo mar sadexaadba. mar walbana gacantiisa ayuu soo dulmarinayaa caloosha, hadii wax ka soo baxaan xaga danbena wuu maydhayaa, dabadeed wuxuu daloolka ku daboolayaa maro dun ah ama wixii u dhigma. hadiise uu istaagi waayo waa in lagu joojigyaa dhoobo diiran ama waxii kale ee u dhigma ee ay isticmaalaan dhakhaatiirtu hadii la heli karo. dabadeedana wuxuu ugu ku celinayaa waysadii, hadii uu ku noqon waayo daahir sadex jeer

wuxuu uga celinayaa maydhitaan shanaad ama todobaad, dabadeed wuxuu ku qalajinayaa maro, wixii udayg/cuud ahna wuxuu u dhex galinayaa dhinacyadiisa iyo xubnaha uu ka sujuudo, hadii uu wada gaadhsiiyo jidhkiisa dhamaana way ka sii fiican tahay, dharka lagu kanfayo maydkana wuxuu ku shidayaa bukhuur ama wixii u dhigma. Hadii shaarubaha maydka ama cidiyihiisu dhaadheer yihiina wuu ka jarayaa, hadii uu iska daayana dhib kuma jirto, timaha uma feedhayo, timaha bisqinta/shicirada kama xiirayo mana gudayo haduusan gudnayn, maxaa yeelay arintaasi daliil looma hayo. Maydka Haweenayda ah timaheeda waxa loo gunti sadex qaybood oo xaga danbe loogu sii daynayo. SHANAAD KAFANATA MAYDKA

Qofka raga ah sida u haboon waa in lagu kanfo sadex maro oo cadcad, oo ayna ku jirin khamiis iyo cimaamad, sidii Nabiga scw loo sameeyay, taasi oo la dhexgalinayo maydkiisa laguna duuduubayo, hadii lawaayo oo lagu kanfo khamiis iyo gunti-hoosaad iyo maro lagu duubana dhib kuma jirto.

Haweenayda waxaa lagu kafnayaa shan maro: jubad, khimaar, guntiimo, iyo labo lagu duubayo. wiilka yarna hal maro ilaa sadex. gabadha yarna: Jubad iyo labo lagu duubayo.

Midase waajibka ah dhamaantood waa Hal maro oo asturta maydka dhamaantii, Hadiise uu yahay qof ixraaman (xaj iyo cumro ku jira) waxa lagu mayrayaa biyo iyo Gob, waxaana lagu kafmayaa guntigiisa iyo go'iisa ama maryo kaleba, madixiisa iyo wajigiisana lama daboolayo, udayg looma marinayo, maxaa yeelay waxa lasoo saari doonaa isagoo talbiyada akhrinaya (Labbaykalaahumma labbayk), sida uu Rasuulku scw. sheegay. Hadiise ay tahay haweenay waxaa loo kafmayaa sida caadiga ah, loomana marinayo Udayg, wajigeedana laguma daboolayo Niqaab gacmaheedana Qufaasaad, laakiin waxaa lagu qarinayaa marada Kafanka ah.

LIXAAD QOFKA MUDAN IN UU MAYRO KUNA TUKADO SALAADA

Qofka ugu mudan in uu maydho ama ku tukado maydka raga ah waa ruuxa uu u dardaarmay, hadii la waayana waxay u kala mudan yihiin sidan: Aabihii, Awowgii, qaraabada kale qofba qofka uu ka dhaw yahay ee uu ka xigo.

Qofka ugu mudan in uu maydho ama ku tukado maydka dumarka ah waa ruuxa ay u dardaarantay, hadii la waayana waxay u kala mudan yihiin sidan: Hooyadeed, Ayaydeed,

inta u soo dhow ee haween ah, labada is qabaa way is maydhi karaan, Abubakar Sadiiq waxaa mayrtay haweenaydiisi, Cali bin Abii Daalibna wuxuu mayray haweenaydiisii Faadumo. Allaha ka raali noqdo dhamaantoodba.

TODOBAAD QAABKA LOOGU TUKANAYO MAYDKA Afar jeer ayuu odhanayaa Allahu Akbar, mida hore dabadeed wuxuu akhrinayaa Faataxada hadii uu raaciyo suurad kalena way banaan tahay sida kasoo aroortay ibnu Cabaas Allaha ka raali noqdee, mida labaad dabadeed wuxuu ku Salinayaa Nabiga scw sida marka uu Attixyaadsanayo, mida sadexaad dabadeedna wuxu odhanayaa:

اللهم اغفر لِحينا وميتِنا ، وشاهدنا وغائبنا ، وصغيرنا وكبيرنا ، وذَكَرِنا وأنثانَا ، اللهم من أحيَيْتَهُ منا فأحيه على الإسلام ، ومن توفيته منا فَتَوَفهُ على الإيمان ، اللهَم اغفر له ، وارحمه ، وعافه ، واعف عنه ، وأكرِم نُزُلَه ، وَوَسع مُدخَلَه ، واغسله بالماء والثلج وِالبرد ، ونقه من الخطايا كما ينقى الثوب الأبيض من الدَنس ، وأبدلهُ دارا خيرا من داره ، وأهلا خيرا من أهله ، وأدخله الجنة ، وأعذه من عذاب القبر ، وعذاب النار ، وافسح له في قبره ، ونور له فيه ، اللهم لا تَحرمنَا أجره ولا تُضِلنا بعده ،

dabadeed marka Afraad ee uu Allahu Akbar yiraahdo wuu salaamo nakhsanayaa. Waxa sune ah in uu kor u qaado gacmihiisa mar kasta oo uu odhanayo Allaahu

Akbar, Hadii maydku yahay qof haweena wuxuu odhanayaa Allaha u danbi dhaafo haweenayda. Hadii ay lobo qof yihiina wuxuu odhanayaa: Allaha u danbi dhaafo labadooda. sidaas oo kale marka ay yihiin maydad badan wuxuu odhanayaa Allaha u danbi dhaafo dhamaantood Hadii midka dhintay yahay Shafeec yarna wuxuu ku badalaa ducada sidan:

اللهم اجعله فرطا وذُخْرًا لوالديه، وشفيعاً مُجَابا ، اللهم ثقل به موازينهما ، وأعظم به أجورهما ، وألحقه بصالح سلف المؤمنين ، واجعله في كفالة إبراهيم عليه الصلاة والسلام ، وَقِهِ برحمتك عذاب الجحيم .

Sida sunada ah waa in uu marka uu tukanayo imaamku isku aadiyo/toosiyo madaxa maydka hadii uu yahay lab, hadii uu dhidig yahayna dhanka dhexda, marka uu kuwada tukanayo lab iyo dhidigna waa in xagiisa uu soo mariyo labka dhidigana dhanka qiblada. Hadii maydadka ay ku jiraan Ubad yaryarna waxa uu dhankiisa soo marinayaa ubadka labka ah, haweenkana wuu ku xigsiinayaa, ubadka dhidiga ahna wuu u danbaysiinayaa, wuxuuna isku beegayaa Imaamku marka uu ku tukanayo madaxa ubadka labka ah iyo dhexda haweenka, ubadka dhidigna madaxooga ayaa lagu beegayaa mada haweenka. dadka kale ee aan imaamka ahayna waxa ay daba joogsanayaan gadaashiisa/dabadiisa, hadiise qofku waayo meel uu xaga

danbe ka joogsado wuxuu istaagi karaa midigta imaamka. SIDEEDAAD QAABKA LOO AASAYO MAYDKA sida sharciga ah waa in hoos loo qodo qabriga in qisaas ahaan ku siman qof badhkii, loona sameeyo Luxxud, oo maydka loo dhigo dhanka midig, lagana furo guntimaha kafanka, lamana faydayo wajigiisa rag iyo dumar midkuu doono ha noqdee, dabadeed waxaa lagu xiri luxudka jaajuur (bulukeeti) iyo ciid dhoobo ah si uuna u dhaqaaqin. hadii la waayo jaajuur (bulukeeti) wixii kale ee la helo ayaa lagu dabooli, sida loox ama dhagaxaanba, dabadeed ciida ayaa lagu dul shubi qabriga iyadoo lagu dhawaaqayo: BISMILAAHI, WA CALAA MILATI RASUULILAAHI Qabriga waxa dhulka kor looga qaadi inta ku siman TAAKO, waxaana la dul daadin Quruurax hadii ay suurto gasho, biyana waa lagu rushi. Dadka sii sagootinaya maydka waxaa loo jideeyay in ay dul joogsadaan qabriga oo ay u duceeyaan, Nabigu scw, waxa uu samayn jiray in marka uu dhameeyo aaska dul istaagi jiray qabria oo uu odhan jiray: Ilaahay u waydiiya danbi dhaaf walaalkiin, u waydiiya sugitaan, hada ayaa la waydiin doonaa su'aashee. SAGAALAAD Waxaa loo jideeyay ruuxa aan ku tukan salaadii markii hore in uu qabriga ku dul tukado marka la aaso.

Nabigu scw. wuu sameeyay midaas, laakiin hadii in kabadan bil ka soo wareegto ma haboona in lagu dul tukado qabriga. maxaa yeelay arintaas lagama soo guurin nabigeen scw. isaga oo samaynaya.

TOBNAAD Ma banaana in ehlka maydku u sameeyaan cuno dadka kale. waxaa daliil u ah midaas hadalkii laga wariyay Saxaabiga wayn Jariir Bin C/laahi Albajali, r.c Waxa aan ku tirin jirnay isku imaatinka ehelka maydka iyo samaynta cuntadaba aaska ka dib in ay tahay baroor diiq la reebay. waxa wariyay Imaam Axmed, Sanad xasan ah. Hadiise loo sameeyo iyaga cunto, ama martida u timidayba wax dhib ahi kuma jirto midaas, waxana haboon in dadka qaraabada la ah iyo dariskuba u sameeyaan cunto sida nabigu scw laga soo guuriyay markii loo sheegay dhimashada Jacfar bin Abii Daalib: waxa uu amar ku bixiyay in loo sameeyo cunto ehelka reer Jacfar wuxuuna yiri: Waxa helay wax mashquuliyay

wax dhib ahina kuma jirto in dadka laga dhintay ay u yeeraan dad kale si ay ula cunaan cuntooyinka loo keenay, mana jirto wakhti ku xidhan midaas.

KOW IYO TOBNAAD mana banaana in haweenaydu ay u basaasto (agasha) ruuxa dhintay ka badan sadex cisho, marka laga reebo haweenayda uu dhintay odaygeedu,

midaas waxa loo ogol yahay inay odaygeeda u basaasto (agasha) afar bilood iyo toban casho, hadii ayna ahayn mid uur leh, waxa basaasteedu ku egtahay inta ay uurka dhigayso, sidaas ayaa sunada Nabiga scw. kusoo aroortay

Ruuxa raga ah uma banaana inuu cid u basaaso ama u baroordiiqo.

LABO IYO TOBNAAD Raga waa loo jideeyay in ay booqdaan qabuuraha, si ay ugu soo duceeyaan uguna soo waano qaataan. Xadiiska Nabiga Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee: {Qubuurta booqda waxay idin xasuusin aakhirada} Muslim ayaa saxiixiisa kusoo saaray Nabigu scw waxa uu ahaa in uu baro saxaabadiisa hadii ay booqdaan qabuuraha in ay yidhaahdaan:

السلام عليكم أهل الديار من المؤمنين والمسلمين ، وإنا إن شاء الله بكم لاحقون ، نسأل الله لنا ولكم العافية ، يرحم الله المتقدمين منا والمستأخرين :

oo macnaheedu yahay: Salaan korkiina ha ahaato dadkan Muminiinta iyo muslimiinta ahow. anaguna waan

idin soo haleeli doonaa, waxaan ilaahay u waydiinaynaa anaga iyo idinkaba in uu na cafiyo, Allaha u naxariisto kuwa horeeyay iyo kuwa danbayndoonaba.

Haweenku ma booqanayaan qabuuraha, Rasuulkuna scw arintaas wuu ka reebay, sababtoo ah waxaa looga cabsi qabaa in ay ku fitnoobaan oo ay sabri waayaan inta uu ku dhaco beer jilayc, sidaas oo kale uma banaana in ay raacaan wakhtiga lasoo aasayo, maxaa yeelay Rasuulku scw, wuu ka reebay midaasna. Hase yeeshee waxaa loo baneeyay in ay ku tukadaan maydka ama masjid ha joogaan ama meel kalee.

Intaasi ayaa ugu danbaysay wixii aan soo ururiyay.

Naxariis iyo Nabad galyo korka Nabi Muxamed ha ahaato iyo ehelkisaba iyo saxaabadiisiiba.

# Index

**DURUUS MUHIIM U AH UMADA DHAMAANTEED....................2**

**HORDHAC.................................................................4**

**DURUUS MUHIIM U AH UMADA DHAMAAN ..........................5**

DARSIGA KOOWAAD : SUURADA AL-FAATIXA IYO SUURADAHA GAAGAABAN ........................................................................ 5

DARSIGA LABAAD: TIIRASHA ISLAAMKA ................................ 5

DARSIGA SADEXAAD: TIIRASHA IIMAANKA ............................ 6

DARSIGA AFARAAD: QAYBAHA TAWXIIDKA IYO QAYBAHA SHIRKIGA............................................................................ 6

DARSIGA SHANAAD: IXSAANKA AMA SAMAFALKA .............. 12

DARSIGA LIXAAD: SHURUUDA SALAADA............................. 12

DARSIGA TODOBAAD: TIIRASHA SALAADA .......................... 12

DARSIGA SIDEEDAAD: SALAADA WAAJIBAADKEEDA............ 13

DARSIGA SAGAALAAD: CADAYNTA ATTIXYAADKA: .............. 13

DARSIGA TOBNAAD: SUNOOYINKA SALAADA ...................... 15

DARSIGA KOW IYO TOBNAAD: SALAADA WAXYAABAHA BURIYA .................................................................................. 17

DARSIGA LABO IYO TOBNAAD: SHURUUDAHA WAYSADA.... 18

DARSIGA SADEX IYO TOBNAAD: WAYSADA FARADYAALKEEDA: ........ 19

DARSIGA AFAR IYO TOBNAAD: WAYSADA WAXYAABAHA BURIYA (JABIYA) ........ 19

DARSIGA SHAN IYO TOBNAAD: ISKU QURXINTA AADAABTA IYO AKHLAAQADA LOO JIDEEYAY QOF KASTA OO MUSLIM AH ........ 21

DARSIGA LIX IYO TOBNAAD: KU DHAQANKA AADAABTA ISLAAMKA ........ 22

DARSIGA TODOBA IYO TOBNAAD: KA DIGTOONAANTA SHIRKIGA IYO QAYBAHA DANBIYADA (MACSIDA) ........ 22

DARSIGA SIDEED IYO TOBNAAD: QABANQAABADA MAYDKA, KUTUKASHADIISA IYO AASKIISA........ 23

**INDEX ........ 33**

# تنشر الإسلام بأكثر من 100 لغة

موسوعة القرآن الكريم
QuranEnc.com
موسوعة تضم تفاسير وتراجم موثوقة لمعاني القرآن الكريم

موسوعة الأحاديث النبوية
HadeethEnc.com
موسوعة تضم ترجمات للأحاديث النبويــة وشروحها بعدة لغــات

موسوعة المصطلحات الإسلامية
TerminologyEnc.com
موسوعة تضم ترجمات المصطلحات الإسلاميــة وشروحها بعدة لغــات

منتقى
المحتوى الإسلامي
موسوعة تضم المنتقى من المحتوى الإسلامي باللغات

IslamHouse.com
مرجعيــة مجانيــة إلكترونية موثوقة للتعريف بالإســلام

جمعية الدعوة وتوعية الجاليات بالربوة
Rabwah

جمعية خدمة المحتوى الإسلامي باللغات